



Tilmaamaha codsiga CPI iyo sameynta baaritaanka raadraaca ee loo baahan yahay.

1. Dib-u-eeg shuruudaha xaq-u-yeelashada ee ku qoran Qaybta 1aad si aad u go'aamiso haddii aad xaq-u-leedahay soo gudbinta codsiga CPI.
2. Samee codsiga CPI adiga oo adeegsanaya mid ka mid ah ikhtiyaaradan soo socda:
 - a. Barta internet-ka <https://www.dcyf.wa.gov/safety/can-founded-findings/cpi/cpi-request-form>; ama
 - b. Buuxi Qaybta 2aad ee hoose. Foomkan oo luuqado kale ku qoran waxaa laga heli karaa https://dcyf.wa.gov/forms?field_number_value=09-012&title.
3. Buuxi codsiga raadraaca loo baahan yahay adiga oo adeegsanaya mid ka mid ah ikhtiyaaradan soo socda:
 - a. Barta internet-ka <https://fortress.wa.gov/dshs/bcs> adiga oo adeegsanaya barnaamijka internet-ka laga dalacdo ee loo yaqaanno Google Chrome ka-dibna hayso koodh-ka xaqiijinta barta internet-ka si aad ugu darto Qaybta 2aad ee hoose ama foomka codsiga CPI ee internet-ka; ama
 - b. Buuxi foomka [Oggolaanshaha Baaritaanka Raadraaca \(DSHS 09-653\)](#).
4. Ku soo dir Email ama boostada mid kasta oo ka mid ah foomamkan gacanta lagu buuxiyey dcyf.cpi@dcyf.wa.gov ama PO Box 40993, Olympia, WA 98504.

Kala-xiriir DCYF dcyf.cpi@dcyf.wa.gov ama 1-800-998-3898, ikhtiyaarka 8, haddii aad qabto su'aalo ku saabsan hannaankan ama barnaamijkan.

QAYBTA 1AAD. Shuruudaha Xaq-u-yeelashada

DCYF waa in ay raacdaa shuruudaha lagu muujiyay [RCW 74.13.720\(4\)](#) si ay u go'aamiso haddii aad xaq-u-leedahay in aad codsato CPI. Xaq uma lihin CPI haddii mid ka mid ah kuwan soo socda ay ku khuseeyaan:

- Haddii laga joogo wax ka yar shan sano tan iyo markii lagugu helay xad-gudub ama dayac carruur
- Haddii horey laguugu diiday CPI labadii sano ee la soo dhaafay
- Haddii aad ahayd mowduuca laga helay xad-gudub ama dayac carruur ka-dib marka aad heshay CPI
- Haddii lagugu helay xad-gudub galmo, dhiigmiirasho galmo, ama xad-gudub jireed oo ku lug lahaa goyn, gubid, farogelinta neefsashada cunug, ruxidda cunug ay da'diisu ka yar tahay 3, ama ugu hanjabidda cunug hub dillaa ah
- Haddii aad leedahay xukun lagugu xukumay ama aad ku lug leedahay dembi baaris aan weli go'aan laga gaarin, ama xukun ka baxsan gobolka, federaalka ama gobolka oo dambi culus ah kaas oo u dhigma:
 - Dambi culus kasta ee ku lug leh dayaca jireed ee cunug oo waafaqsan [Cutubka 9A.42 RCW](#)
 - Dambi culus kasta ee ku cad [Cutubka 9A.32 RCW](#) ama [Cutubka 9A.36 RCW](#) ee ku lug leh dhaawaca jireed ama dhimashada cunug
 - Dambi kasta oo tacaddi guri ah oo culus oo loo geystay qoys ama xubin ka tirsan qoyska sida lagu qeexay [Cutubka 10.99 RCW](#)
 - Dambi culus oo ka dhan ah cunug sida ku cad [Cutubka 9.68A RCW](#)
 - Mid kasta oo ka mid ah dambiyadan culus ee soo socda:
 - Dembi kasta oo loogu qeexay sharci kasta sida dambiga dabaqadda A ama isku-day lagu geysanayo dambiga dabaqadda A
 - Weyddiisasho dembiyeed ama shirqool dembiyeed oo lagu geysanayo dambiga dabaqadda A
 - Dil kama ah oo darajada koowaad ama labaad ah
 - Xorriyado edeb-darro ah
 - Afduub darajada labaad ah
 - Gubid darajada labaad ah
 - Baad darajada koowaad ah
 - Dhac darajada labaad ah
 - Toogasho iyada oo gaari la wado
 - Dil gaari ku lug leh

QAYBTA 2AAD. Foomka Codsiga CPI

MAGACA DAMBE	MAGACA KOOWAAD	MAGACA DHEXE	TAARIKHDA DHALASHADA
LAMBARKA TELEFOONKA	CINWAANKA EMAIL-KA	KODHKA XAQIJIJINTA BAARITAANKA RAADRAACA	

QOWMIYAD (ikhtiyaari ah)

Macluumaadkan lama garanayo marka la go'aaminayo in lagu siiyo CPI waxaanna keliya loo adeegsan doonnaa in lagu caawiyo DCYF diyaarinta xog waxtar leh oo faahfaahineysa dedaallada meesha loogaga saarayo isku-dheelitirnaan la'aanta iyo kala-duwanaanshaha qowmiyadaha.

- ☐ Hinddida Mareykan ah ama Alaskaan Dhallad ah
- ☐ Eeshiyaan
- ☐ Madow ama Afrikaan Mareykan ah
- ☐ Hisbaanik/Laatiin
- ☐ Dhallad Hawaayaan ah ama qof kale oo ka yimid Jasiiradaha Baasifigga
- ☐ Caddaan
- ☐ Aan lagaranayn

BAYAANKAAGA (ihhtiyaari):

DOKUMENTIYADA LAGU SOO DARAYO (ikhtiyaari):

Bayaannada iyo dokumentiyo kasta ee muujinaya sida uu hab-dhaqankaaga isu beddelay tan iyo markii la oggaaday xad-gudubka iyo dayaca carruurta ayaa gacan ka geysanaysa qiimeyntan waxaanna ka mid noqon kara, balse aanan ku xaddidnayn:

- Qiimeyn iyo daraaseyn dhowaan ah
- Dhammeynta ama horumarka ku aaddan dhammeynta barnaamijyada, adeegyada, ama daaweynta ay maxkamad amartey ee lagu taliyay
- Tixraacyada laga helay loo-shaqeeyayaasha, xirfadlayaasha, iyo hay'adaha aqoonta u leh qofnimadaada hadda
- Waxbarasho kasta, shaqada iskaaga ah, taariikhda shaqo, ama ku lug lahaanshaha bulshada
- Macluumaadka kale ee tilmaamaya hab-dhaqanka isbeddelay ama dhaqan-celinta